

Taariikh, 01.10.2020,

Ku : Dhamaan dhaqanka dhulbahante
Ku : Dowladda Goboleedka Puntland
Ku: Dowladda Federaaka Soomaaliyeed
Ku: Dhamaan Ummadda iyo Dhaqanka Soomaaliyeed
Og: Garaad Abdirizaq Garaad Soofe Duraan
Og: Reer Shawe Cali-Gari Dibad iyo gudahaba

Go'aan : **Xeerka Reer Shawe Cali iyo Ogaysiis Caaqilka cusub.**

Kadib soo jeedintii Gudiga Farsamada ee Quba-joogta Reer Shawe-Gari, waxay Reer shawe Cali-Gari oo uu hormuud u yihin waxgarka qurba-joogta, gudiga gudaha ama dalka iyo Caaqilka cusub ee ku Meel gaarka ah, waxay gudoonsadeen Xeer Cusub oo lagu dhaqayo Reer Shawe Cali-Gari kaas oo hoos ku qodobaysan:

Waxay Reer Shawe Cali Gari, oo hormuud u yahay Caaqilka cusub ee ku meel gaarka, Mohamed Abdillahi Mohamed (Gadhweyne), wax-garadka qubajoogta dibadda iyo guddiga dalka in wixii qudhooyo ah:

1. Reer Shawe Cali ay qaateen shareecada islaamka lana wafajiyoo diinta wixii dil badheedh ah ee uu gaysto qof reer shawe. Qofkii Reer shawe ah ee Qof dila isagana shareecada la waafajiyoo oo waa dil ama Qisaaso, wax mag ahna laga bixin maayo.
2. Waxay sidoo kale Reer shawe gudoonsadeen in qofkii wax ka dila ay shareecada mariyaan magna aysan qaadan. Si dadka deegaanka u kala bad-baadaan.
3. Waxay Reer shawe qaateen in ninka Reer Shawe ee wax dila ay soo qabashadiisa leeyihiin reerkiisa oo ah (Aabe, Walaal, Adeer, ina Adeer, Aabe.. iwm) ama jifadiisa hoose oo ah qoys gacan ku dhiig-laha, iyaguna masuuliyada qaadayaan.
4. Waxay Reer shawe Xeeriyeen in hadii mag la Qaato wixii dil ah ee aan badheedh ahayn, la siiyo (75 Shan iyo todobaatan Halaad) jifada ama qoyska wax laga dilay si loo samirsiyo.
5. Sidaas waxay ku burburiyeen magtii ku salaysnayd (33 halaad) ee jifda ee dhaqanka soomaaliyeed ka sinayeen.
6. Waxay Reer shawe Cali-Gari isla qaateen in hadii qoys Reer Shawe Cali-Gari ah Mag Qaato ama Dayo, isla markaasna ay dil gaystaan ay tahay dhamaanteed soo celis, si magta loogu bixiyo hadii u gacan ku dhiigluha ka bad-baado Qisaas.

Caaqil Mohamed Abdillahi Mohamed (Gadhweyne)

Master of Sc. In social & Legal Studies

Ogaysiis:

Waxaa dhamaan dhaqaanka dhulbahante iyo soomaaliyeedba la ogaysiinayaa, in markii ay taariikhdu ahayd **29.10.2019**, ay Reer Shawe Xilkii ka qaadeen **Caaqil Cali Cabdi Cali (dhagodalool)** sababo jiray owgeed. Isaguna uu qarwaaqsaday oo uu xilkii mar (2) labaad iska casilay. Waxay Reer Shawe Caaqil ku Meel gaar ah u xuusheen aqoon yahan **Caaqil Mohamed Abdillahi Mohamed (Gadhweyne) oo ku nool dalka Switzerland**. Waxaa la ogaysiinaya Garaadka Abdirizaq Garaad Soofe iyo Dhaqaanka Soomaaliyeed inay kala xidhidhaan danta Reer shawe Caaqilka cusub. Dhankale, waxaa Reer Shawe Loogu baaqaya in ay si deg-deg ah isugu yimadaan shirweyne si ay u soo doortaan Caaqil ka jawaabi kara baahidooda oo wanaaga u horseedi kara dibad iyo gudaha. Alle bari weyn ay dhigan.

Mohamed Abdillahi M. Ali Mire(Weyne)

Afhayeenka Guud ee Qurbajoogta ahna xubin Gudiyada gudaha iyo dibada ee Nabadeynta

Gudiyada Dibada iyo Gudaha:

1. Abdi Yusuf Ali Aflow (USA)
2. Mohamed Abdillahi M. Ali Mire (Sweden)
3. Abdirizaq Ahmed Ali Aflow (Danemark)
4. Mohamed Samatar Obsiye (Somalia)
5. Mohamed Abdirahman Mohamed (Saudi Arabia)
6. Abdirahman Mohamed Hassan (USA)
7. Amina Mohamed Hassan (Djibouti)
8. Waris M. Abdoullahi (Switzerland)
9. Mohamed Ahmed Ali Aflow (Danemark)
10. Said Mohamed Ali Aflow (Australia).
11. Zuhur Abdirahman Mohamed (Saudia Arabia)
12. Ahmed abdikarim Ahmed (Kenya)
13. Abdi-malik Abdikarim Ahmed johor (USA)
14. Hassan Abdillahi M. Ali Mire (Mogadishu)
15. Samatar Ali Samatar Obsiye (Mogadishu)
16. Said yusuf Ali Aflow (Danemark)
17. abdi-Gali Mohamed Hassan (Doolo/ Ethiopia).
18. Abdillahi Ibrahim Ali Aflow (Somalia/ Kismayo).
19. Ali Ibrahim Ahmed Gale (Canada).